



CenterPoint Energy waxay ka heshay oggolaansho Minnesota Public Utilities Commission (Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota) (MPUC) si ay u bilowdo kasoo kabashada kharashyada gaaska dabiiciga ah oo aad u sarreeya laga bilaabo Febraayo 2021, iyada oo loo marayo biilka lacagta dheeraadka ku-meelgaar ah ee Lambarka Dukumentiga (Docket) G-999/CI-21-135. Waxaan dooneynay inaan ku ogeysiino in kharashyadan ay ku muuqan karaan biilkaaga oo lagu calaamadeeyay “Feb 2021 Weather Event (Dhacdada Cimilada Febraayo 2021).”

Bartamihii Febraayo, qaybo badan oo dalka ka mid ah waxay la kulmeen muddo dheer oo heerkul aad u qabow ah, iyo dalabka gaaska dabiiciga ahi wuxuu noqday mid ka sarreeya sidii caadiga ahayd. Dalabkan ka sarreeya tii caadiga ahayd ee gaaska dabiiciga ah iyo arrimaha siinta muhiimka ah ee meelaha qaarkood ayaa gacan ka gaystay si lama filaan ah, oo aan horay loo arag qiimaha gaaska. Dhacdadan ayaa keentay kharash gaas dabiici ah oo sidii caadiga ahayd aan ahayn.

MPUC waxay oggolaatay codsigeena inaan bilowno ka-soo-kabashada kharashaadka macaamiisha muddo 27 -bilood ah laga bilaabo Sebtember 2021 - Noofambar 2023. PUC waxay wali dib u eegaysaa kharashyada dheeriga ah, iyo qaddarrada laga soo ururiyey macaamiisha waxaa loo soo celin doonaa illaa ay ka badan yihiin kharashaadka ugu dambayntii MPUC oggolaatay.

Qiimaha CenterPoint Energy ay ku bixino gaaska dabiiciga ah waxaa si toos ah loogu gudbiyaa macaamiisha iyadoon wax kharash dheeri ah lagu darin, mana ka macaashno CenterPoint Energy iibinta gaaska dabiiciga ah.

MPUC waxay ka reebtay macaamiisha deggenayaasha dakhligoodu hooseeyo ee qaata ama dhowaan ka helay Low-Income Home Energy Assistance (Kaalmada Tamarta Guriga ee Dakhliga Yar) ee lacagta dheeraadka ah ee biilka. Haddii aad tahay macmiil la dhibtoonaya biilashaada, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad wacdo lambarka 800-992-7552 ama booqato barta [CenterPointEnergy.com/PaymentAssistance](https://CenterPointEnergy.com/PaymentAssistance) si aad wax uga ogaato xulashooyinka sida Kaalmada Tamarta.

Si aad wax badan uga ogaato lacagtan dheeriga ah ee ku-meel-gaarka iyo kharashyada gaaska dabiiciga ah ee aan caadiga ahayn laga bilaabo Febraayo 2021, booqo [CenterPointEnergy.com/Feb2021Costs](https://CenterPointEnergy.com/Feb2021Costs).